Isbeddellada Guud ee Ugu Muhiimsan

Abaarta ka jirta gobollada dhexe ayaa u korsatey dhinaca waqooyi ee degaannada nolol-raadsiga daaqsatada ah ee banka Sool, dooxada Nugaal iyo Hawd. Sida lagu sheegey digniin ay 23kii Juunyo soo saartey Shabakadda Nidaamyada Ka Sii Digista Abaarta (FEWSNET), roobabkii Gu'ga oo yaraa oo ay weheliso dhowr xilli oo isku xiga oo ay roobabku ka yaraayeen intii caadiga ahayd ayaa dhalisey calafka xoolaha oo yaraada oo taasna ay keentey taranka iyo qiimaha xoolaha oo hoos u dhacay. Abaarta ayaa halis gelineysa nolol-raadsiga in ka badan 700,000 oo daaqsato ah iyo tiro badan oo qoysaska magaalada deggan ah kuwaas oo ilaha dakhligooda iyo cuntadooduba ay la xiriirto suuq-geynta iyo ganacsiga xoolaha. Geeddi-socodka Codsiyada Iskujira ee Soomaaliya oo tiigsanaya in uu gargaaro kooxaha nugul ayaa 44 boqolkiiba la maalgeliyey iyada oo waaxda beeraha iyo nolol-raadsiga ay heshey 9 boqolkiiba maaliyaddii ay u baahneyd. Gargaar nolol-raadsi oo degdeg ah ayaa loo baahan yahay si looga hortago in ay aad uga sii darto xaaladda haqab-beelka cuntada ee waqooyiga.

Toddobaadka dhexdiisa, waxaa ka sii dartey xaaladda ammaanka dalka taas oo saameysay kumanaan rayid ah, gaar ahaan magaalada Muqdisho. Barnaamijkii quudinta cuntada karsan ee laga soo bilaabo Nofember 2007dii ka socdey 16 goobood ayaa 20kii Juunyo loo xirey xaaladda ammaanka ee ka sii dartey daraaddeed kaas oo weli xirnaa 26kii Juunyo. Arrintan ayaa saameysey in ka badan 80,000 oo dad nugul ah oo maalin kasta ka-faa'iideysan jirey cuntada goobahaas lagu qaybin jirey. Hawl biyo dhaamin ahayd oo ka socotey degmada Kaaraan ayaa ay nabadgelyo-xumadu carqaladeysey. Dhammaadkii toddobaadka (19-21 Juunyo) ayaa dagaallo ba'ani looga soo warramey magaalo-madaxda kuwaas oo ay ku dhinteen in ka badan 23 qof ayna ku dhaawacmeen ku dhowaad 100 kale badiba degmooyinka Kaaraan iyo Shibbis ee waqooyiga caasimadda. Dad lagu qiyaasey 26,000 oo qof ayaana ku barokacay. Guud ahaan, ugu yaraan 160,000 oo qof ayaa ka barokacay Muqdisho ilaa 7dii maajo markii ay dagaalladu halkaa ka soo cusboonaadeen.

Maamulihii dugsiga Xannaanada Carruurta ee Cusbitaalka SOS ee la afduubey toddobaadkii hore ayaa la sii daayey 25kii Juunyo. Toban iyo lix shaqaalaha bani'aadamnimada ah ayaa weli lagu haystaa Soomaaliya ilaa 2008dii.

25kii Juunyo, afar nin oo dhalinyaro ah oo lagu heley dhac ayaa magaalada Muqdisho looga jarey gacmahooda midig iyo lugahooda bidix. Hay'adda *Amnesty International* ayaa gacmaha iyo lugaha isdhaafka loo gooyey ku cambaareysey war ay soo saartey isla maalintaa oo ay ku tiri "Ciqaabahan ayaa ah jildil." *Amnesty* ayaa sheegtey in dhammaan dhinacyada iskahorimaadyada ku lug leh, oo ay ku jiraan xubnaha kooxda hubeysan ee Al-Shabaab ay qabanayaan shuruucda caalamiga ah ee bani'aadamnimada ee xaaraantinimeynaya jildilka xaalad kasta ha lagu jiree.

Waxqabadka

In kasta oo ay marar badan u dib dhaceen sababo la xiriira nabadgelyo-xumada Muqdisho, ayaa qaybintii agabka aan cuntada ahayn ee UNHCR iyo la-hawlgalayaasheeda ay toddobaadka dhexdiisa bilaabatey taas oo lagu gaarey 9,000 oo ka faa'iideystayaal ku nool waddada Afgooye ah. Qaybinta agab kaa oo kale ah oo la siinayo 4,900 oo ka-faa'iideystayaal ku nool Km 13 ayaa iyana hadda socota, iyada oo 4,000 ka-faa'iideystayaal kale oo ku nool waddada Afgooye la qorsheeyey in iyana agabkaa oo kale loo qaybiyo. UNICEF ayaa agabkaa u qaybisey 6,282 qoys oo ku nool waqooyiga Muqdisho.

UNICEF iyo la-hawlgalayaasheeda ayaa sidoo kale gacan ka geysanaya bixinta biyo ammaan ah oo la cabbo oo waddada Afgooye loogu qaybiyo 200,000 oo qof (qiyaastii in ka badan 180,000) ka dib markii dad badan oo cusub ay soo qaxeen ilaa 7dii Maajo. Intaa waxaa dheer, in toddoba ka mid ah tobankii kaalimood ee biyaha laga dhaansan lahaa la dhammeystirey oo ay shaqeynayaan, iyaga oo biyo ammaan ah siinaya degaanka Kax-Shiiqaal ee magaalada Muqdisho. Bartamaha ilaa dhammaadka Luulyo, marka la dhammeystiro dhammaan tobanka kaalimood ayaa ay ka faa'iideysan doonaan dad gaaraya 22,000 oo qof.

Sanduuqa Waxqabadka Bani'aadamnimada ayaa taageeraya biyo-dhaamin degdeg ah oo loo sameynayo in ka badan 30,000 oo bulshooyin daaqsato, reer-miyi iyo reer magaal isugu jira oo dega Puntland iyada oo loo sii marinayo NGO-yada Vetaid, Muslim Aid iyo NRO/RAHMO.

Somaliland, ayaa WFP iyo la-hawlgalayaasheeda (GAVO, MEDAIR iyo Wasaaradda Caafimaadku) ay hadda u qaybinayaan cunto dad gaarayo 42,700 oo qof oo ku nool gobollada Awdal, Togdheer iyo W/Galbeed. Puntland, 1,400 oo qof ayaa barnaamijyada quudinta kaga faa'iideystey degmada Iskushuban, gobolka Bari. Magaalada Waajid ee gooblka Bakool, 11,700 oo qof ayaa heley gargaar cunto halka 1,080 ka-faa'iideystayaal kale ah ay cunto ku heleen degmada Hobyo ee gobolka Mudug.

UNICEF iyo NGO-ga SWB ayaa dhammeystirey dhismaha iyo rakibidda bam-gacmeed ay saareen afar ceel oo ku yaalla meelo ka mid ah magaalada Doolow ee gobolka Gedo. Mashruuca ayaa higsanaya in uu yareeyo cudurada ka dhasha biyaha iyada oo biyo ammaan ah la siinayo 1,000 qoys.

La soo xiriir: Faahfaahinta dheeriga ah ee afka Ingiriisiga, kala soo xiriir: Rita Maingi +254 734 800 120 – maingir@un.org. Af-Soomaaliga ama Ingiriisiga, kala soo xiriir Muna Maxamed + 254 733 643 737 – mohamed26@un.org